



PreK 4 ME Family Links


**CUTUBKA 5: HOOSASKA IYO**

**IYO HUMAAGTA**


**Dulmarka Cutubka 5: Hoosaska iyo Humaagta**

*Fasalka waxaa ku baashaalaynaa barashada sida nalku u saameeyo dadka iyo xayawaanada. Waxaan tijaabo ku samaynaynaa nalka iyo samaynta hoosas, waxaana baraynaa sida humaagtu u samaysanto. Waxaan ka shaqaynaynaa fikradahaan sayniska wax badan, waxaana dhisaynaa aasaasyada Cutubka 6. Waxaan siiwadaynaa barashada xarfaha iyo dhawaaqyada xarfaha, waxaana kobcinaynaa eray bix-inteena, intaan ka wada shaqaynayno gudaha fasalka hormarinta fahankeena iyo wada hadalkeena qaabab wanaagsan!*

**BUGAAGTA MURAAJACADA ee**  
**Cutubka 5**




Raccoon on His Own  
Oo uu qoray Jim Arnosky



The Puddle Pail  
Oo ay qortay Elisa Kleven



Night Job  
Oo ay qortay Karen Hesse



Moonbear's Shadow  
Waxaa qoray: Frank Asch  
Sawiro lagasoo qaaday Amazon.com

**Ciwaannada kale ee aan akhrinayno:**  
Play With Me Oo ay qortay: Marie Hall Ets

Kitten's First Full Moon  
Waxaa qoray: Kevin Henkes

Guess Who's Shadow  
Waxaa qoray: Stephen R. Swinburne

Clap Your Hands

Waxaa qoray: Lorinda Bryan Cauley

**Heesaha, Ciyaarta Erayga iyo Xarfaha**

Dhawaaqa laxanka leh iyo ciyaarta erayga ayaa ah qaabab shactiro ah oo muhiim ah oon u adeegsano fasalka si aan u barno ilmaha fikradaha tirsiga. Halkaan waxaad ka helayaa mid aan baranay ood ilmahaaga la wadaagi karto. Waydii ilmahaaga inuu ku tuso sida aan ugu samayno arintaan dugsiga!

**Shan Kaluun oo Yaryar**

Shan kaluun yaryar oo barkad ku dabaalanaaya,  
Kan koobaad ayaa dhahay, "Barkadu waa qaboow."  
Kii labaad ayaa dhahay, "Barkadu waa qoto dheer tahay."

Kii sadexaad ayaa dhahay, "Waxaan doonayaa inaan seexdo."

Kii afraad ayaa yiri, "Aan hoos u quusno."


Kii shanaad ayaa yiri, "waxaan u jeedaa markab."

Doonta kaluumaysiga ayaa timid;

Safka ayaa kala yaacay!

Shantii kaluun ee yaryaraa ayaa kala cararay!

kala cararay!



Sawir lagasoo qaatay Pixabay

**Arag bogga kale si aad u aragto nashaadaadka guriga**



# Waxbarashada leh Nashaadaadka Dheeraadka ah Gee Guriga!

**Heerarka Xisabata,  
Dareenka Bulshanimoo,  
Qaababka Loo Waajaho  
Waxbarashada**

## Tirinta Shilimaadka

Soo aruuri 10 sheey oo yaryar, sida shilimaad, ama waxyaabo kale oo gurigaaga laga helo. Isku xarii 5 kamid ah oo waydii ilmahaaga tirada alaabaha meesha yaala. Marka ilmahaagu tiriso alaabta, u wareeji goobin ahaan oo waydii ilmahaaga tiradooda. Waxaad ku dari kartaa alaabo kale oo ay tiriso marka ilmahaagu diyaar u tahay.

**Farshaxan Hal abuur leh,  
Saynis, Heerarka Qaabka  
Waxbarashada oo  
waajahaayo**

## arshaxanka Hooska

Saar sheey iftiinka toosha saaran meel siman (ama nalka laanbad ama toosh) si hoosku uga muuqdo waraaqda. Waydii ilmahaaga inay fiiriso hooska sheeyga. Markaad dhamayso, ilmahaaga ayaa midab marin karta hooska, kuna dari karta sawirka.

**Heerarka Fanka, Cilmiga  
Bulshada, Sayniska, Hor-  
marinta Jirka**

## Buuga Hooska

Raadi buug qoraal yar, ama dhawr waraaqood isku dhaji. Kusoo wareeg guriga, fagaaga, jardiinada, ama meel kasta ood doonto. Waydii ilmahaaga inay sawirto hoosaska ay u jeedo in-taad socotaan. Waad ka caawin kartaa ilmahaaga calaamadaynta sawirada iyo qorista buugaaga shaqsigaa ah ee hoos-ka



Sawir lagasoo qaatay Pixabay

## KALMAD KU SOCOTA QOYSASKA IYO DARYEELAYAASHA:

ILMAHAAGU WAXAY DHAWAAN GELI DOONAAN FASALKA BIRIMADA, TAASI WAXAY KA DHIGAN TAHAY XORIYAD BADAN OO DHEERAAD.. WAAD TAAGEERI KARTAA ARINTAAN MARKAAD GURIGA JOOGTAAN::

- \* U DHIIB ILMAHAAGA SHAQOYINKA YARYAR EE KU XEERAN GURIGA, SIDA MEEL DHI-GISTA BOONBALAYAASHA IYO DHARKA AMA NADIIFINTA MIISKA KADIB MARKA CUNTO LAGU CUNO..
- \* KA CODSO ILMAHAAGA INAY ISKEED U LABISATO MAALINTII, ADOO CAAWINAAYA HADDII LOO BAAHDO.
- \* U SHEEG ILMAHAAGA INAY ALAABTA KU GURATO BOORSADEEDA DUGSIGA.